NAPLAN

NAPLAN - macluumaadka loogu talo galey waalidiinta iyo daryeelayaasha

2023

Maxay ardaydu ugu fadhiistaan NAPLAN?

NAPLAN waa qiimaynta farbarashada iyo xisaabta qaranka oo ay u fadhiistaan ardayda fasalada 3, 5, 7 iyo 9 sanad walba. Waa qiimaynta qaran ee kaliya ee dhammaan ardayda Australiyaanka ahi ay fursad u haystaan in ay sameeyaan.

Marka ay ardaydu ka gudbaan sannad dugsiyeedkooda, waxaa muhiim ah in la hubiyo sida wanaagsan ee ay u baranayaan xirfadaha muhiimka ah ee akhriska, qorista iyo xisaabinta.

NAPLAN waxay qiimeysaa xirfadaha wax-akhris iyo xisaabeed ee ardaydu ku baranayaan manhajka dugsiga waxayna u ogolaataa waalidiinta/daryeelayaasha inay arkaan sida ilmahoodu uga hormarayo heerarka qaranka iyo mudo ka dib.

NAPLAN waa hal dhinac oo ka mid ah nidaamka qiimaynta iyo warbixinta dugsiga. Ma beddelayso qiimaynaha socda ee ay macallimiintu sameeyeen ee ku saabsan waxqabadka ardayga, laakiin waxay siin kartaa macallimiinta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan horumarka ardayda.

NAPLAN waxay kaloo siisaa dugsiyada, maamulada waxbarashada iyo dawladaha macluumaadka ku saabsan sida barnaamijyada waxbarashadu u shaqeeyaan iyo haddii da'yarta Australiyaanka ahi ay gaadhaan natiijooyin waxbarasho oo muhiim ah xagga akhris-qoraalka iyo xisaabta.

Ilmahaaagu wuxuu imtixaanada NAPLAN ku samayn doonaa online

Dugsiyadu waxay ka soo gudbeen waraaqo ku salaysan qiimayn una gudbeen qiimaynta kombayutarka. Dhammaan ardayda Sannadka 3aad waxay sii wadi doonaan dhammaystirka qiimaynta qoraalka ee warqadda.

Imtixaanada NAPLAN ee onlyanka ah waxaa uu siiyaa laylis badan oo natiijada imtixanaadka waa mid soo jiidata ardayda. Mid ka mid ah faa'iidooyinka ugu muhiimsan waa imtixaan lagu cabirey ardeyga (ama la qabsiga leh), halkaas oo imtixaanku ku soo bandhigayo su'aalo laga yaabo inay ka sii adkaadaanayaan ama ka sahlanayaaneyaan iyadoo ku xidhan jawaabaha ardayga.

Imtixaanka lagu cabirey ardeyga waxa uu ogolaadaa in la qiimeeyo awoodaha arday kala duwan oo si sax ah loo cabbiro heerka ardayga. Guud ahaan natiijada NAPLAN ee ardaygu waxay ku salaysan tahay tirada iyo adeyga su'aalaha ay sida saxda ah uga jawaabaan. Ilmahaagu waa inaanu ka welwelin haddii ay uu u arko su'aalo adag; Waxaa laga yaabaa inay marayaan waddad imtixaan oo aad u adag.

Maxay NAPLAN ku qiimaysaa?

NAPLAN waxa ay qiimeysaa farbarashada iyo xirfadaha xisaabeed ee ardaydu ku baranayaan manhajkooda caadiga ah.

Ardaydu waxay u fadhiistaan qiimaynta qoraal, akhris, farsamada luuqadda (higaada, naxwaha iyo xarakaynta) iyo xisaabta. Su'aaluhu waxay qiimeeyaan waxa ku xidhan Manhajka Australia: Af-Ingiriisiga iyo Xisaabta.

Dhammaan maamulada waxbarashada dowliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn waxay gacan ka geystaan horumarinta qalabka imtixaanka NAPLAN.

Ka qayb qaadashada NAPLAN nap.edu.au.

U diyaargarowga NAPLAN

NAPLAN waa loogu talo galey qof walba. ACARA waxay taageertaa imtixaan loo wada dhan yahay si ardaydu uga qaybqaataan barnaamijka qiimaynta qaranka.

Ardayda naafada ah ee leh awoodo shaqo iyo baahiyo kala duwan ayaa loo heli karaa imtixaan loo badaley.

Dugsiyadu waa inay la shaqeeyaan waalidiinta/daryeelayaasha iyo ardayda si ay u gartaan, xaaladbe -xaalad, isbeddello macquul ah oo looga baahan yahay ardayda naafada ah si ay u sameeyaan NAPLAN. Hagaajinta waa inay ka tarjumaysaa taageerada sida caadiga ah lagu siiyo qiimaynta fasalka.

Si aad gacan uga geysatid ogeysiinta go'aamadan, waxaad la tashan kartaa meesha bandhigga dadweynaha ee NAPLAN, Hagaha dugsiyada si looga caawiyo ardayda naafada ah si ay u galaan NAPLAN, ama fiidyowgayada taxanaha ah ee ay waalidiinta/daryeelayaasha, macalimiinta iyo ardaydu ay ku wadaagaan khibradooda isticmaalka habaynta NAPLAN.

Xaalado gaar ah, arday naafo ah oo si aad ah u xaddidaysa awooddooda ka qaybgalka qiimaynta, ama arday dhawaan yimid Australia oo luuqadiisa asalku aanay Af-Ingiriisi ku hadlin, waxa la siin karaa ka-dhaafitaan rasmi ah.

Maamulaha dugsigaaga iyo maamulka imtixaanka deegaankaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u hagaajinta ardayda naafada ah ee imtixanaadka ama habka loo baahan yahay si loo maro si aad ku heshid dhaafitaan rasmi ah.

Translation © VCAA

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu dugsiga ka maqnaado maalmaha NAPLAN?

Haddi ay suurtagal tahay, dugsiyadu waxa ay diyaarin karaan arday gaar ah oo maqanaa wakhtiga imtaxaanka si ay u dhamaystiraan imtixaanadii seegay wakhti kale inta lagu jiro jadwalka imtixaanka dugsiga.

Maxaa dhacaya haddii dugsigaygu xidhan yahay maalmaha NAPLAN?

Dugsiyada leh sababo adag oo laga yaabo in loo fasaxo in ay jadwalka imtixaanka ka dhigaan 9-maalmood ka dib mudada imtixaanka.

Maxaan samayn karaa si aan u taageero ilmahayga?

Ardayda lagama filayo inay wax u bartaan NAPLAN. Waxaad taageeri kartaa ilmahaaga adiga oo u xaqiijiya in NAPLAN uu yahay qayb ka mid ah barnaamijkooda dugsi oo aad xasuusisid inay si fudud u dadaalaan. Barashada iyo sharaxaadda NAPLAN qaarkood ayaa faa'iido leh si ay uga caawiso ardayda inay fahmaan oo ay ku qancaan qaabka imtixaanada. Macalimiinta ayaa hubin doona in ardaydu ay yaqaaniin noocyada su'aalaha imtixaanada waxayna ku siin doonaan taageero iyo tilmaamo ku haboon.

ACARA kuma talinayso u diyaargarowga xad-dhaafka ah ee NAPLAN ama isticmaalka adeegyada tuyuutar bixiyayaasha.

Ka eeg noocyada su'aalaha iyo qalabka laga heli karo qiimeynta NAPLAN ee onlaynka ah nap.edu.au/online-assessment/public-demonstration-site.

Jadwalka NAPLAN

Mudada imtixaanka NAPLAN waa sagaal maalmood. Tani waa in la tixgaliyo dugsiyada laga yaabo inay leeyihiin qalab yar.

Mudada Imtixaanka NAPLAN waxa ay bilaabanaysaa Arbacada 15ka Maarj waxa ayna dhammaanaysaa Isniinta 27ka Maarj 2023. Imtixaannada waa in sida ugu dhaqsaha badan loo qorsheeyaa gudaha mudada imtixaanka, iyadoo muhiimada la siineyo toddobaadka horre.

Sidee loo riboodhgareeyaa heerka shaqo ee ilmahayga?

Heerka shaqo ee ardayga shakhsi ahaaneed waxa lagu muujiyaa heerka guusha qaran ee qiimayn kasta. Miisaankani waxa uu tilmaamayaa in ardaygu ka soo baxayo waxa laga filayo xagga akhris-qoraalka iyo xisaabinta loo baahan yahay si uu si buuxda uga qaybqaato heerka sanadkaas.

Warbixinta ardayga gaarka ah ee NAPLAN waxaa bixin doona dugsiga ubadkaaga sanadka dambe. Haddii aadan helin warbixin, waa inaad la xidhiidha dugsiga ilmahaaga.

Sidee loo isticmaalaa natiijooyinka NAPLAN?

- Ardayda iyo waalidiinta/daryeelayaashu waxay u isticmaali karaan natiijooyin shaqsiyeed si ay ugala hadlaan horumarka ardayda.
- Macalimiintu waxay isticmaalaan natiijooyinka si ay ka caawiso sidii ay ku aqoonsigan lahaayeen ardeyga u baahan caqabado waaweeyan ama taageero dheeraad ah.
- Dugsiyadu waxay u adeegsadaan natiijooyinka si ay u aqoonsadaan meelaha ay ku wanaagsan yihiin iyo meelaha baahida loo qabo si loo horumariyo barnaamijyada waxbaridda, iyo in loo dejiyo yoolalka akhris-qoraalka iyo xisaabta.
- Nidaamyada dugsiyadu waxay u isticmaalaan natiijooyinka si ay u eegaan barnaamijyada iyo taageerada la siiyo dugsiyada.
- Bulshadu waxay ka arki kartaa macluumaadka ku saabsan waxqabadka dugsiyadu waqti ka dib myschool.edu.au.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan NAPLAN:

- la xidhiidh dugsiga ilmahaaga
- La xidhiidh maamulka imtixaanaadka nap.edu.au/TAA
- Booqo nap.edu.au

Si aad u baratid sida ACARA u maamuso macluumaadka gaarka ah ee NAPLAN, booqo nap.edu.au/naplan/privacy.

Tijaabi	Shuruudaha jadwalka	Muddada	Tilmaanta tijaabada
Qoraal	• Ardayda fasalka 3aad waxay ku sameeyaan imtixaan qoraal ah warqad (maalinta 1 oo kaliya) • Sannadka 5, 7 iyo 9 qoraalku waa inuu bilaabmaa maalinta 1 (dugsiyada waa inay mudnaanta siiyaan dhammaystirka qoraalka maalmaha 1 iyo 2 oo keliya, iyada oo maalinta 2 kaliya la isticmaalo marka ay jiraan xaddidaadyo farsamo / macquul ah)	Sannadka 3: 40 miridh Sannadka 5: 42 miridh Sannadka 7: 42 miridh Sannadka 9: 42 miridh	Ardayda waxaa la siiyaa 'kicinta qoraalka' (mararka qaarkood loo yaqaan 'prompt' - fikrad ama mawduuc) waxaana la waydiiyaa inay ku qoraan jawaab nooc gaar ah (qoraal sheeko ama qancin ah)
Akhriska	• In la dhammeeyo imtixaanka qoraalka ka dib • In la dhammeeyo ka hor heshiisyada imtixaanka luqadda	Sannadka 3: 45 miridh Sannadka 5: 50 miridh Sannadka 7: 65 miridh Sannadka 9: 65 miridh	Ardeydu waxay akhriyaan qoraallo kala duwan oo warar-xog ah, mala-awaal ah iyo qoraallo qancin ah ka dibna waxay ka jawaabaan su'aalaha la xidhiidha
Ku wada hadalka luqadda	• In la dhammeeyo imtixaanka akhriska ka dib	Sannadka 3: 45 miridh Sannadka 5: 45 miridh Sannadka 7: 45 miridh Sannadka 9: 45 miridh	Wuxuu qiimeeyaa higaada, naxwaha iyo xarakaynta
Xisaabta	• In la dhammeeyo ka dib imtixaanka kuwada hadalka luqadda	Sannadka 3: 45 miridh Sannadka 5: 50 miridh Sannadka 7: 65 miridh Sannadka 9: 65 miridh	Wuxuu qiimeeyaa tirada iyo aljabrada, cabbiraadda iyo joomatari, iyo tirakoobyada iyo ixtimaalka